## Talo Fasalka

| |
|---|
| Imaaw xiisadahoo dhan:<br>• Waqtigii lagaa rabady imaaw<br>• Xiisadoona dhamaan ha bixin |
| Diyaar ahoow:<br>• Aqri oo faham casharka inteysan xiisada bilaawan—diyaarso su'aalo kaa caawiya wixii aad fahmi weysay<br>• Dib ugu noqo casharadii hore<br>• Diyaarso outline, fikrado, sameena leylis |
| Fariiso kuraasta hore:<br>• Si muuqata u dhageyso<br>• Qoro casharka<br>• Su'aalo weeydii |
| Raadso Caawinaad<br>• Booqo baraha su'aalsona weeydii xiliga uu xafiiskiisa joogo<br>• Ka raadso caawinaad ardayda kale,<br>• Sameyso saaxiib aad wax isla barataan<br>• Aad goobta barashada—wax aqriso, qor, ama xisaab samee |
| Casharkaaga xiligii lagaa rabay keen, imtixaanaadkana ha gafin:<br>• Ka dhig shaqadaada heerka-kuliyada, soona celi xiligii lagaa rabay<br>• Ha isticmaalin mar-marsiyo oo qarinayo diyaar-garow la'aantaada |
| Macquul noqo, isticmaal kalendaaryo, lana soco jiheeyaha fasalka (course syllabi)<br>• Jadwalkaaga ku dhig casharada, imtixaanka iyo project-iyada.<br>• Jadwaleyso xiligaad wax aqrisan laheyd—halkii sac aad xiisad ku jirtid laba sac oo aqrin ah u gooy<br>• Daacadnimo u habee xiligaaga qoyska, qaaska, shaqada, fasalka, tacliinta, iyo gaadiidka (transportation)<br>• 15 karedhit = shaqo buuxdha (full time job) |

## Talo Isdiyaarin

| |
|---|
| Qaado 4 sano ee xisaabta dugsiga sare |
| Qaado xiisado u-diyaar-gorowga kuliyada, ee habeysan, iyo xiisado darajo sare ah |
| Qaado xiisado ku siinaya cilmi laf-dhabar ah, sida sociology, cilmi-nafsiyeed, joqoraafi, anthropology, filosoofi, biology, chemistry iyo physics. |
| Sameeyso xifrad adage e dhanka xiriirka: aqrinta, qoraalka, hadalka iyo dhageysiga |
| Qaado fasalado isu-diyaarinta kuliyada ee dhanka aqrinta iyo tabta barashada (study skills) |

MNADE Publication
Minnesota Association for Developmental Education
Except where otherwise noted, this content is licensed under a Creative Commons Attribution 3.0 License.

# Diyaar garoownaanta Kuliyada:

# Fahmka Farqiga u Dhaxeeya Dugsiga Sare iyo Koliyada

**Horumarka Kuliyada!**

Ardayda horumarka leh si daacadnimo ku jirto ayeey u dabagalaan sidii eey u fahmin lahaayeen fikradaha, eyna u noqon lahaayeen ruux raba inuu wax waliba ogaado, su'aalo weeydiiyo, siina wata dabci wanaagsan ee wax-barasho.

Brochurekaan waa hage loogu talagalay ardayda, waalidka, iyo maclimiinta si eey u kala saaraan farqiga u dhaxeeyn kara dugsiga sare iyo kuliyada.

www.mnade.net

## Waajibaadka Ardayga

| Dugsiga Sare<br>"Macalinkaa Caawiya" | Kuliyada (Jaamacada)<br>"Ardaygaa haga" |
|---|---|
| Dugsiyada sare iyo maclamiinta waxeey kasbaan xaadirinta ardayga | Ardayda horumarka gaarta waxeey xaadiraan fasal waliba inkastoo eeysan qasab ku aheyn ineey xiisad waliba joogaan |
| Maclamiinta ayaa ardayda soo xusuusiyo casharada, imtixaanka, iyo shaqaduu ardayga gafay | Ardayda ayaa casharka ka shaqeeysata imtixaanka waqtigii laga rabay qaata |
| Maclamiinta ayaa ardayda u sheega waxeey baranayaan | Ardayda horumarka leh ayaa go'aansada waxeey baranayaan iyo sideey u baran lahaayeen iyagoo isticmaalaaya hab u gooni ah |
| Maclamiintaa:<br>• U kooba wuxuu ku saabsan yahay casharka<br>• U diyaariya leyliska<br>• U sameeya study guide-ka<br>• Una diyaariyo su'aalo | Ardayda horumarka leh:<br>• Waxeey isticmaalaan hab wanaagsan ee buugaagta u aqristaan<br>• Si wanaagsan ayeey casharka u guursadaan, joogtana wey u bartaan<br>• Waxeey diyaarsadaan study guides, qariirado<br>• Waxeeyna la yimaadaan su'aalo iyo jawaabo ka kala yimi dhinacyo kala duwan. |
| Maclimiinta ayaa haga cilmi-baarida iyo faahfaahinta meesha laga keenayo | Ardayda horumrka leh waxeey leeyihiin qibrad u leeyahiin sida maktabada iyo mareeg-dhexaadka (inter-ka) cilmi baaris loogu sameeyo. |
| Maclamiinta ayaa siiya ardayda faahfaahin dheeraad ah oo ka caawin kara fasalka | Ardayda horumarka leh iyagaa day-daya wixii faah faahin ah oo maada ku saabsan, iyagaana raadsada meelaha eey ka heli lahaayeen |
| Macaliinta ayaa ilaaliya ardayga dadaalkiisa iyagoo si joogta ah u tusinaya kaalinta uu ardayga ka joogo fasalka | Ardayda horumarka leh iyagaa ka taxadara horumarkooda iyagoo mar waliba sameeysta bartilmaameed horumar leh. |
| Maclimiinta ayaa edbiya ardaygii hadal micnadara ah fasalka la yimaado | Macalimiinta u ma dulqaataan ardayga hadal micnadaro ah fasalka la yiimaada |
| Maclamiinta badanaa kuma qasbaan inuu ardayga waqti badan uu siiyo casharkuu fasalka ku soo bartay | Ardayda horumarka leh halkii sac eey fasal ku jiraan 2 ilaa iyo 3 saacadood ayeey casharkaas aqristaan |
| Maclamiinta waxeey ardayda siiyaan waqti uu fasalka dhexdiisa wax ku aqristo iyadoo jirto waxyabo qasi kara | Ardayda horumarka leh waxeey aad u isticmaalaan meelaha wax lagu aqristo ee kuliyada ku taala, xaafadana meel beey u sameystaan eey wax ku aqristaan |
| Dad baa u hagaajiya ardayga waqtiguu fasalka galihaa, sportiga ciyaari lahaa, iyo waqtiguu shaqeyn lahaa | Ardayga horumarka leh waxaa waajib ku ah inuu sameysto system uu waqtigiisa ku hago si eeysan waqtigii fasalka, waqtiga barashada, waqtiga shaqada iyo xiligi uu saaxiibadii la wadaagi lahaa eeysan isu dhex yaacin |
| Badanaa ardayda fasalka eey ka helaan ayeey qaataan | Ardayda horumarka leh fasalada eey qaataan waxeey ku eegaan taqsuuskooda ama waajibaadka badalka kuliyada (hadii eey u badalanayaan kuliyad kale) |

## Goobaha Tacliinta

| Dugsiga Sare<br>"Ardaygaa diirada la saaraa" | Kuliyada<br>"duruustaa diirada la saaraa" |
|---|---|
| Maclamiinta cashar gaaban oo daruusta ka hadlayo ayeey bixiyaan | Maclamiinta cashar dheer oo daruusta ka caawinayo ayeey jeediyaan |
| Fasalada dugsiyada sare badanaa waxeey ka kooban yihiin 30 arday iyo wixii ka yar. | Fasalada kuliyada badanaa weey weyn yihiin 40-100 arday in kor u dhaafto ayeey ka kooban yihiin. |
| Fasalada dugsiyada sare joogto ayaa loo kulmaa | Fasalada kuliyada isbuuciiba 2 ilaa 3 jeer ayeey kulmaan |
| Maclamiinta ayaa sharaxa casharka wuxuu ku saabsanyahay | Maclamiinta waxeey u qaataan inuu ardayga yaqaano casharaka xifradihiisa iyo wuxuu ku saabsanyahayba. |
| Maclamiinta waxeey ku hagaan ardayga wax barashadiisa su'aalo | Maclamiinta waxeey ka sugayaan ardayga inuu su'aalo la yimaado |
| Maclamiinta daruustoo dhan fasalka ayeey ku mariyaan | Ardayga ayaa masuul ka ah daruustiisa, hadii uu macalinka mariyay iyo hadii kalaba. |
| Maclamiinta ayaa dejiya habeenta fasalka | Ardayda waa ineey sameystaan hab/tab eey ku habeystaan casharadooda, leyliskooda, iyo warqadaha loo qeybiyay (buugaatooda iyo folder-kooda) |

## Kaalmada iyo Caawinta (Resources and Support)

| Dugsiga sare<br>Macalinka/waalidka ayaa haga | Kuliyada<br>Ardayga ayaa haga |
|---|---|
| Ardayga maclamiintooda joogta ayeey u la kulmaan meesheey marayaana waa lala socodsiiyaa | Ardayda horumarka leh waqtiyo yar unbeey maclamiinta la kulmaan waa ineeyna ka warqabaan meesha eey marayaan |
| Maclamiinta iyo waalidiinta ayaa haga waxyaabaha tacliinta la xiriira eey ardayda qaaska ah u baahan yihiin | Ardayda horumarka leh iyagaa raadsada waxyaabaha tacliinta iyo waxyaabaha qaaska ah eey u baahan yihiin |
| Maclamiinta ayaa laga helaa caawinaad dheeraad ah | Ardayda horumarka leh iyagaa raadsada caawinaada asaagooda, xiliga xasiifka macalinka ayeey ka raadsadaan caawinaad dheeraad ah. |
| Saaxibada iyo qoyska ayaa ardayga caawiya | Ardayda ma helaan caawinaada qoyska waa ineey sameystaan hab cusub eek u helaan caawinaad |

## Kaalamada iyo Caawinaada

| Dugsiga sare<br>Macalinka/waalidka ayaa haga | Kuliyada<br>Ardayga ayaa haga |
|---|---|
| Maclamiinta waxeey bixiyaan cashar habeeysan oo wata tilmaamo qaas ah | Ardayda horumarka leh waxeey sameeystaan turjumtaan casharkooda cilmi-baaristana si madax banaan ayeey u sameystaan |
| Maclamiinta badanaa waxeey bixiyaan intixaano run/been, jawaabta saxa la bax, ama jawaab gaaban bixi ah. | Maclamiinta badanaa waxeey bixiyaan imtixaano adag oo wata habeeyn, ka shaqeeysiin, ama kala saarida fikradaha iyo theory-ga, iyagoo isticmaalayo habka jawaabta saxa ah kala bax ama jawaab dheer qor ah. |
| Maclamiinta waxeey bixiyaan imtixaano badan iyo imtixaanaadkii ku soo dhaafay inaad qaadatid aadna ku ceshatid imtixaankaadka qaarkood | Maclamiinta imtixaanaad yar beey bixiyaan (2-3 semesterkiiba) badanaa ma ogolaadaan in markale la qaato iyo wixii ku gafay inaad sameysid. |
| Buundooyinka waxeey ku xiran yihiin qiimeeynta, dhameystirka, iyo dadaalka aad galisay casharadaadoo dhan. | Buundooyinka waxeey ka turjuntaa qiimeeynta waxaaad soo bandhigtay iyo darajada fikirka iyo qoraalka ee levelka kuliyada. |
| Maclamiinta waxeey bandhigaan buundooyin dheeraad ah oo ka waaciya ardayga gareedkiisa | Maclamiinta waajib ku ma aha ineey bixiyaan buundooyin dheeraad ah. |



© 2006 MNADE Executive Committee